# Dhagysiga dacwadda been abuurka daryeelka dadweynaha (cayrta)

## Waa maxay Dhagaysiga Go'aanka Diidmada (ADH)?


Been abuur macneheedu waxa weeye beensheegid ama qarinta xog rasmi ah si aad ku hesho gargaar. Waxaa kaloo ka mid ah iibinta ama isku dayidda iibinta waxtarka Gargaarka Cuntada (SNAP) ama kaararka (EBT). Waxaa kaloo been abuur ah gadashada ama isku day gadasho ee noocyada tubaakada, khamriga oo lagu gato kaararka EBT.

Haddii degmadu u malayso in aad arrimahaas ku kacday, waxay kaa gudbin kartaa dacwad dambiyeed ama waxay kugu qaadi karaan Dhegaysiga Go'aan Diidmada (ADH). Dhageysiga Go'aan Diidmo (ADH) waa dacwad dhagaysi la xiirta haddii aad ku kacday dambi madani ah oo been abuur ah si aad u hesho MFIP, DWP, xanaanaynta caruurta, Gargaarka Guud (GA), taakulaynta guriga (oo hore loo oran jiray taakulo wadareedka guriga), Gargaarka Dheeriga ah ee Minisoota (MSA), Gargaarka Cuntada (SNAP) Gargaarka Degdegga ah (EA) iyo Gargaarka Guud ee Degdegga ah (EGA).

## Maxay tahay in ay Degmadu hubiso?

Marka laga hadlayo ADH degmadu waa in ay si cad oo aan shaki ku jirin u xaqiijiso in uu dhacay been abuur. Taas macneheedu waxa weeye in ay caddayn karaan in aad si ula kac ah u samaysay ama wax u sheegtay si aad degmada uga hesho wax aadan heli lahayn.

## Maxaa dhici kara haddii garsoore (ADH) ah igu helo in aan galay fal dambiyeed been abuur ah?



Dacwadaha intooda badan waxaad ku waayaysaa gargaarka hal sanno haddii dambiga kowaad kugu cadaado, ama 2 sanno haddii mar labaad dambigu kugu cadaado, marka sadexaad haddii dambigu kugu caddaado waxaad si joogta ah u waayeeysaa gargaarka. Haddii laguu diido MFIP waxaad kaloo luminaysa Gargaarka Cunada (SNAP). Haddii garyaaqaanku kugu helo in aad gargaar ka qaadanaysay wax ka badan hal gobol waqti isku mid ah, waxaad waayi kartaa Gargaarka Cunnada muddo 10 sano ah. Kuma gelaysid xabsi mudaysan ADH, laakiin wax kasta oo aad tiraahdo, ama wax kasta oo ay degmadu kugu hesho Dhagaysiga Go'aanka Diidmada(ADH) waxaa loo isticmaali karaa lidigaaga haddii lagaa xereeyo dacwad dambiyeed. Waxaa kaloo kuu furan in aad maamulka maxkanmadda degmada aad ka xerayso racfaan (dib u eegid). Si taxadar leh u hubi waqtiga kama damaysta ah ee *Racfaan Uga Qaadashada Macaashka Dadaweynaha Maxkamadda Degmada*.

## Ma ka tanaasuli karaa dhagaysiga?

Degmadu waxaa suurtal gal ah in ay ku waydiiso in aad saxiixdo foom ay ku qorantahay in aad ka tanaasusho dhagaysiga. **La xiriir gargaare sharci yaqaan si uu tala bixin kuu siiyo ka hor inta aadan saxiixin foomka!** haddaad saxiido foomka, waxaad ka tanaasushay xaqa aad u lahayd in lagu dhagaysto. Waxaad kaloo lagaa joojin karaa gargaarka xitaa haddii aadan qiran in aad ku kacday waxyaabaha ay degmadu sheegayso in aad ku kacday. Haddii aad saxiixdo foomka, waxaad haysataa illaa 30 maalmood haddii maskaxdaada wax iska bedeleen, la xiriir gargaare sharci yaqaan haddii aad su'aalo ka qabtid dacwadda.

## Weli mala igu qaadi dacwad dal dambiyeed?

Haa. Degmadu waxay kugu soo oogi kartaa Dhagysi Go'aanka Diidmada (ADH) iyo dacwad dambiyeed lidi kugu ah labadaba. **Wax kasta** oo aad u sheegtay degmada waxaa mar dambe loo isticmaali karaa lidigaaga. Haddii aad warbixin samayso ama aad warqad saxiixdo, waxaa laga yaabaa in aad ka tanaasushay xaqii aad u lahayd in aad isticmaasho xeerka (5th Amendment) marka dambe ee lagugu maxkamadaynayo gal dambiyeed. (the 5th Amendment) waa xeer sixitaan lagu sameeyay qalad dhacay oo xaq kuu siinaya in adigu aadan isku markhaati furin marka lagugu qaadayo dacwad fal dambiyeed dawladdu kugu soo oogayso. Haddii aad talo u baahantahay la hadal garyaqaan si aad u hesho macluumad ama xog ku saabsan arrinkaan.



## Maxaa dhici kara haddii aan racfaan (dib u eegid) ka qaatay ogaysiin in la iga joojiyay ama hoos loo dhigay gargaarki aan qaadan jiray?

Racfaanka waxaa lagu biirin karaa Dhegaysiga Go'aanka Diidmada (ADH) iyo dhegaysiga been abuurka. **Doono kaalmo xagga sharciga ah isla markiiba.** Waxaa suurogal ah in dhageysigu waa mid aad u adag, waayo waxa ay degmadu rabto in ay xaqiijiso way ka duwan tahay sababta loo joojiyay gargaarkaaga marka loo eego beenabuurka. Degmadu waxa keliya ee ay doonayso waxa weeye in ay xaqiijiso caddaymaha oo dhan in ay taageerayaan sababta loo jaray ama hoos loogu dhugay gargaarkaaga. Laakiin waxay u baahanyihiin cadaymo xaqiijin kara in uu dhacay been abuur.

## Maxaa dhici kara haddii la igu soo oogay dacwad fal dambiyeed?

Waa in aad weydiisataa in lagaa xooro ama dib laguugu dhigo Dhegaysiga Go'aanka Diidmada (ADH). Waa in aad isla markiiba la hadashaa garyaqaan bartay difaaca dambiyada! Waxaa sura gal ah in ay kuu banaantahay in aad yeelato garyaqaan difaace dadweyne ah.

**Maxaa dhici kara haddii la igu xukumo dambi been abuur ama aan ku jiro barnaamijka dacwad joojinta?**



Haddii lagugu helo dambi la xiriira khiyaano daryeelka (gargaarka) dadweynaha, waxaad waayeeysaa gargaarkaagii. Waxaa kaloo laga yaabaa in xabsi lagu dhigo, ama ganaax lagu saaro. Waxaad waayaysaa gargaarka hal sanno haddii dambiga kowaad kugu caddaado, ama 2 sanno haddii mar labaad dambigu kugu cadaado, marka sadexaad haddii dambigu kugu caddaado, waxaad si joogta ah u waayeeysaa gargaarka. Xukunkaan waa kugu soconayaa xitaa haddii aad ku jirto barnaamijka dambi joojinta ama maxkamadi amartay joojin iyo kor kala socosho.

**Maxaa dhici kara haddii aanan ahayn muwaadin Ameerikaan ah?**

Haddii aadan ahayn muwaadin Ameerikaan ah la xiriir garyaqaan sida ugu dhaqsa badan. Arrimaha kor ku xusan waxay wax yeeli karaan sharciga aad dalka ku joogto.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2021 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**